AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Waxbarashada dadka-waaweyn

Halkan Australia, waxbarashada waxaa loo arkaa hab nolosha oo dhan kula-soconaya. Xataa markii dadku ay waayeel noqdaan, way sii wadi karaan waxbarashadooda ama xataa waxay aadi karaan dugsiga markii ugu horreysey. Dhigashada dugsiga iyo barashada sida loogu hadlo, loo aqriyo ama loo qoro Ingiriisiga waa muhiim waxayna kugu caawin doontaa inaad si buuxda uga qaybgasho nolosha Australia aadna ka dareento nolol raaxo leh halkan Australia. Xirfadaha Ingiriisiga waxay kaloo muhiim u yihiin shaqo helidda waxayna ku xidhan yihiin fursadaha shaqada oo wacan.

## Barashada Ingiriisiga – (Adult Migrant English Program - AMEP)

Dowladdu Australia waxay kugu caawinaysaa inaad barato Ingiriisi si lacag la'aan ah adoo maraya barnaamijka AMEP waxayna kugu dhiirigelineysaa inaad qaadato fursadan. Waxaad xaq u leedahay inaad barato Ingiriisiga ilaa 510 saacadood hase ahaatee waa inaad isku diiwaangelisaa ilaa lix bilood imaanshaha ama waxaad luminaysaa xaqaas. Haddii aad haysato carruur dhalin-yaro ah, child-care-ka lacag la'aanta ah ayaa loo diyaarin karaa carruurta da'da dugsiga ka yar intaad dhiganayso fasallada. Kala-doorashada waxbarashada oo kala duwan ayaa loo heli karaa macaamiisha shaqeeya, ilaaliya carruurta yaryar ama xubnaha kale ee qoyska. Tusaale ahaan, macaamiisha waxay awoodaan inay wax ku bartaan guriga ama ayadoo uu caawinayo baraha guriga ama waxay dhigan karaan waqti-dhimman ama fasallada saacadaha ka baxsan. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.education.gov.au/amep

## Khayaarada waxbarashada

Dadka waaweyn kuwaas oo doonaya inay sii wadaan waxbarashadooda waxay heli karaan khayaaro kala duwan. Caawimaad lacageed oo qaab taageero dakhli ah ayaa lagu heli karaa wax barashada taasna waxay ku xiran tahay dakhligaaga iyo hantidaada kale. Wixii macluumaad dheeraad ah, oo ku saabsan mashruuca taageerada lacageed, kala xiriir Wasaaradda Adeegyada Bulshada (Department of Human Services), ama ka eeg www.humanservices.gov.au

### Dhammaynta dugsiga sare

Haddii aad ka weyn tahay da'da 18 sano oo aadan dhammayn dugsiga sare, waxaad wax ka baran kartaa Koleejka **Technical and Further Education (TAFE)** waxaadna dhammaysan kartaa Shahaadada IV taas oo u-dhiganta heerka dugsiga saree e waxbarashada.

### Barashada xirfad farsamo ama ganacsi

Haya'dda Waxbarashada iyo Tababarka Mihniga (Vocational Education and Training - VET) waxaa loogu talagalay ardayda doonaysa xirfadaha farsamo, tekniko ama ganacsi oo ay ka midka yihiin najaaradda, biyo-gelinta, qurxinta-timaha, jardiinaynta dhulka, adeegyada ganacsiga, dalxiiska iyo martigelinta. Ardayda qaarkeed waxay ka sameeyaan tababarka Koleejka TAFE. Dibloomada dugsiga sare ayaa loo baahan yahay ayadoo ujrooyinka laga qaado wax-baridda iyo buuggaagta. Ardaydu waxay xaq u yeelan karaan Deymaha Ardayda VET si ay marka hore uga daboolaan kharashyada baridda.
Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.studyassist.gov.au



Ardayda kale waxay samaysaa tababarka VET aydoo qayb ka ah shaqo-ku-tababarka. Shaqo-ku-tababarku waxay kulmisaa shaqo camali ah iyo tababarka rasmiga ah ayadoo, markii la dhammeeyona, ardayda siisa shahaado qaran ahaan loo aqoonsan yahay. Mid ka mid ah faai'dooyinka shaqo-ku-tababarka waa ayadoo ay ardaydu qaataan mushahar intay ku jiraan tababarka. Ujrooyinka laga qaado koorsooyinka way u-kala duwan yihiin machadyada. Geliddu waxay ku salaysan tahay xirfadaha looga baahan yahay in lagu sameeyo barnaamijka ama qiimaynta. Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xiriirka koleejka TAFE dowlad-goboleedka iyo taritoori kasta qofka caseworker-kaaga ama propser-kaaga.

### Dhigashada jaamcadda sidii arday heerka koowaad ah

Waxaa jira jaamacado dadweyne iyo kuwa gaar ah halkan Australia. Waxaa kaloo jira jaamacaha ay boosaska Dowladda Commonwealth-ku kabto iyo kuwo boosas llacag buuxda laga bixiyo. Badiba jaamacadaha waxay ardayda qaataan bilaha January/February iyo July/August ayadoo ku xiran koorsooyinka. Jaamacadaha qaarkood waxay kaloo qabtaan barnaamijyada samarka. Si aad jaamacad u-gasho waxaad u baahan tahay inaad gasho dhowr imtixaan si aad u-muujiso heerka Ingiriisigaaga iyo waxbarashadaadii hore. Koorsooyinka kabidda jaamacadda waxay lagama maarmaan u noqon karaan ka hor intaadan isku qorin barnaamijka digriiga. Jaamacadaha Australia waa qaali, si kastaba ha ahaadeene, ardaydu waxay xaq u-yeelan karaan Barnaamijka **Deymaha Waxbarashada Sare (Higher Education Loan Program - HELP)** si uu marka hore uga daboolo qarashyada waxbaridda. Haddii la adeegsado mashruuca HELP, ardaydu tartiib tartiib bay iskaga bixiyaan waxbarashadooda ka dib markay bilaabaan kasabka dakhliga oo ilaa heer la-yaqaan ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.studyassist.gov.au

### Dhigashada jaamacadda sidii arday heerka labaad ah

Shahaadooyinka laga qaatay dibadda waxay u baahan doonaan in si rasmi ah looga aqoonsado jaamacadaha aad doonayso inaad dhigato. Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka (Department of Education and Training) waxay macluumaad ka bixisaa sidii Australia looga aqoonsan lahaa shahaadooyinka waxbarasho ee dibadda. Ganacsiyada qaarkood ama xirfaduhu waxay bixiyaan koorsooyinka 'kabidda' si loogu baddelo shahaadooyinka qofka kuwa u-dhigma heerka Australia. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.internationaleducation.gov.au oo ka baar 'Aqoonsiga Shahaadooyinka' ('Qualifications recognition').

### Dhigashada koorsooyinka waxbarashada ee bulshada

Koleejooyinka bulshada waxay bixiyaan koorsooyinka doonista shaqsiga oo kala duwan sida karinta, luqadaha, qoob-ka-cayaarka, sawir-qadidda iyo kuwo kale oo badan. Koorsooyinkan laguma qaato wax shahaadooyin rasmi ah hase ahaatee waxay waxtar u leeyihiin barashada xirfadaha asaasiga sida loo adeegsado kombiyuutarka, kuwaas oo kugu caawinaya shaqada ama loo sameeyo xisaab-xirka. Waxaa kaloo jira koorsooyinka kuwaas oo gacan ka gaysta in xirfadaha la horumariyo kuwaas oo waxtar u leh codsiga shaqooyinka. Koorsooyinka waxbarashada bulshada waxaa lagu bixiyaa fiidkii iyo weekend-yada dugsiyada iyo koleejooyinka deegaanka waana hab fiican oo lagula kulmo dadka kale. Xaruumaha macluumaadka soo-galootiga qaarkood iyo haya'daha adeegyada soo-galootiga waxay kaloo qabtaan barnaamijyo lagu barto Ingiriisiga, caafimaadka, ladnaanta iyo xirfadaha kale.

## Waxbarashada qoyska oo dhan

Maktabadaha dadweynaha ee degaanka waa ilaha macluumaadka oo aad u wanaagsan. Waxaad ka mid noqon kartaa maktabadda oo lacag la'aan ah waxaadna amaahan kartaa buuggagta, wargeysyada, fiidiyowga iyo CD-yada. Badiba maktabaduhu waxay leeyihiin helitaanka intarneedka lacag la'aanta ah. Waxaa laga yaabaa keliya inaad awoodo inaad adeegsato kombiyuutarka muddo gaaban waxaadna u baahan tahay inaad hore u ballansato adeegan. Waxaa muhiim ah in la raaco xeerarka maktabadda iyo in waqtigooda lagu soo celiyo buuggagta iyo wargeysyada ama waxaa jiri doona ganaax yar.

## Xannaanada ilmaha

Haddii aad shaqayso, wax-barato, tababar qaadato ama aadan awoodin inaad daryeesho carruurtaada muddo gaaban inta lagu jiro maalinta waxaa jira khayaarada noocyo badan oo child-care-ka waqtiga buuxa ama waqtiga dhiman ah oo la heli karo. Qofka caseworker-kaaga ama proposer-kaaga ayaa kaa caawin kara inaad hesho child-care-ka kugu habboon. Macluumaadka dowladda oo ku saabsan adeegyada child-care-ka iyo qawaaniinta, caawimaadda lacageed, adeegyada la siiyo carruurta qabta baahiyaha gaarka ah iyo carruurta ka soo-kala-jeeda asallada dhaqannada kala duwan waxaa laga helaa website-ka MyChild. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.mychild.gov.au

*Qaybta dib loo eegay (April 2018)*

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM